

**SI DHIB YAR OO GUUL LEH OO KHUDAARTA LOO BEERTO:
SIMPLE AND SUCCESSFUL VEGETABLE FARMING:
SIDE E BAAD UGA DIFAACDAA CAYAYAAN DALAGAAGA: IPM
HOW TO PROTECT YOUR CROPS FROM PESTS: IPM (SOOMAALI)**

M1213 Revised 2007

Cayayaan noocyo badan ayaa dhaawac u geysan kara dhirtaada marka ay baxeyso. Cayayaankaasi wuxuu noqon karaa nooca xasharaadka, cudurka geedaha, ama haramah oo dhaawac u keeni kara faa'iida iyo cafimaadka.

Maxey tahey IPM?

IPM waa qorshe ah wixii aad sameyn laheyd marka ay soo weeraraan cayayaanku dagalkaaga. IPM waxey isticmaashaa habab lagu maamulo cayayaanka oo ah kan ugu dhib yar, kharash yar, dhaawaciisuna yaryahey ah oo dhulka iyo hawada aynu neefsano aan dhibaato badan gaadhsiin. Waxad sameysan kartaa qorshahaaga ado isticmaalaya akhbaarta ku saabsan dalagaaga. Isticmaalka IPM, adigu uma baahnid in add isticmaasho suntan cayayaanka haddii aysan wax kale oo qorshaagu shaqeynwaayo.

Maxaan sameeyaa si aan u helo qorshaha IPM?

Waxad heli kartaa akhbaar badan oo ah qorshaha IPM oo aad u baahantahey xagaaga, marka aanad mashquul ku aheyn beer falashda. Waxa laga yabaa in akhbaarta aad u baahantahey in qaarkood ka yimaadaan taariikh falashada noocyada khudrada aad beeran jirtey. Akhbaar kalana waxa aad heli doontaa wakhtiga dagal abuurka, siiba haddii aad heysato cayayaan aan ku jirin qorshaaga.

Waa kuwan talaabooyin aad qaadi karto si aad u sameysid qorshaha IPM:

- Go'anso waxa aad rabtid in aad beerto si ay kaa cawiso cayayaan oo gala dagalkaaga
- U firso dagalkaaga marka ay korayaan si aad u hubiso in ay cifmaad qabaan
- Haddii cayayaanku dhibaato noqdaan, ogoow nooca cayayaanku uu yahey
- Isticmaal wax yaabo dabeeci ah si aad uga saarto cayayaanka

- Hadey waxaba kuu shaqeyn waayaan, isticmaal nooca iyo qiyaasta wanaagsan ee suntan cayayaanka si ay u disho cayayaanka

Sidee baad isu hortaagtaa cayayaanka?

Sida ugu wanaagsan ee aad u difaaci karto dagalkaagu waa adigoo cayayaanka ka fogaaya beertaada. Si uu qorshihii IPM u gaadho waxa la beerayo. Dalaga qaar baa si dabeeci ah ugu adkeysta waxyeelada cayayaanka si wacana u baxa. U wac Jaamicada Minnesota xafiiska Fidista hawolaha dagaanka haddii aad u baahato in aad go'aan ka gaarto waxaad beerta ka beeran laheyd.

Dhirtaadu waxey iska caabin kartaa cayayaanka marka aad ku beerto dagal kala duwan beertaada, ama aad sugto afar sano ka hor inta aanad beerin dagal kii hore oo kale ah isla beertii. Falashada noocana waxa la yidhaa dagal wareejin.

Horaantii haddii uu dagalku caafimaad iyo cunto wanaagsan helo waxa suurtoowda in aanu cayayaanku waxaba yeel karin. Dhirta u dhaxeysii meel balaaran si ay cal-eemuhu u qalalaan. Sidan waxa ku yaraanaysa in cudurada dhirtu aysan faafaan.

Dagalkaaga waxa aad dusha kaga daadin karataa caleemo iyo jidhfo si ay u caawiyaan koritaanka. Caleemaha iyo jidfuhu waxay caawiyaan oo kale in ay carradu qoyaanka xajisato, iyo iyadoo ka ilaalisa xasharaadka, iyo in ay cuduradu ku fidaan.

Sidee loo ilaaliyaa Cayayaanka

Mar haddii uu bilowdo dagal falashadu, sida ugu haboon ee aad cayayaan isga hortaagtaa waa adigoo aad markasta ufiirsada dagalkaaga. Markasta ka eeg in ay jiraan cayayaan, xasharaad iyo cudurada dhirtu. Marka dagalkaagu biqilka yahey, iyo waliba marka uu soo baxayo midhuhu weeyi marka aad ka foajigto. Qorshah IPM guushisu waxey ku xidhantahey ogaanshaha sida cayayaanku noca

uu yahey, dhibaataadu inta ay leegtahey, iyo dhaawacu inta uu dhanyahey.

Xasuus qor ku qor maalinta iyo waxyaabaha aad ku aragto beertada maalintaasi, ku dar:

- Qoritaanka xasharaadka iyo cayayaanka kale ee aad aragto
- Tirade xasharaadka, dhirta cudurku hayo, iyo haramah aad aragto
- Imisuu cayayaanku wax yeel dagalka
- Side buu cayayaanku dhaawac u geystey
- Haddii ay dhibaataada cayayaanku kordheeyso ama ay yaraaneyso

Fiiri dagalkaaga had iyo jeer qorna wixii aad ku aragto, taasi waxey kaa caawin in aad ogaato marka ay dhibaato soobaxdo, iyo inta ay weyni leedahey, ama haddii ay cayayaanku dhaawac u geysteen dagalkaaga si qunyar ah ama dagdagsan.

Sidee loo Istickmaala Hababka Dabeeciga ah si looga saaro cayayaanka.

Sida ugu degdeg badan marka aad ogaato in ay cayayaanku yihii dhibaato, raadi nooca ay yihiin cayayaanku. Jaamicadaad Minnesota xafiiska Fidista Hawlaha Dagaanka ayaa kaa caawin kara arintan.

Marka aad ogaato nooca ay cayayaanku yihiin, isku dey in aad habka dabeeciga ah ku saarto cayayaanka. Habka dabeecig kuma jiraan isticmaalka suntan lagu dilo cayayaanka.

Waa kuwan tusaalooyin hababka dabeeciga ahi:

- Ku wareeji dagalkaga dhir si dabeeciah uga ilaalisa cayayaanka
- Kub dagalka dhintey si aaney cayayaanku ugu fidin dagalka cafimaadka qaba
- Haddii uu cayayaanku yahey xasharaad, isticmaal. Xasharaadku wuxuu cunaa cayayaanka laakiin waxaba ma yeelo dagalka.
- Ku dul daadi dagalka caleemo iyo jidhfo dhintey

Haddii aana hubin sid a loo sameeyo, ama aad rabto in aad ka hadasho habka dabeeciga ah loo isticmaalo, soo wac

si lagaaga caawiyo Jaamicada Minnesota xafiiska Fidinta Hawlaha degaanka.

Sidee baa loo Istickmaalaa Suntan si loo Baabiiyo Cayayaanka.

Sunta cayayaanku waa sun! sidaa darted ayaa liiska xagga ugu dambeysa ee qorshaha IPM ay kaga jirtaa.

Haddii ay noqoto in aad isticmaasho suntan cayayaanka aad ugu taxadir si aayna wax uyaalin carrada, dagalka, reerka, iyo xoolahaba.

AKHRI CALAAMADA SUNTA CAYAYAANKA INTA AANAD FURIN SANDUUQA. Haddii aanad akhri Karin soo wac Jaamicada Minnesota xafiiska Fidista Hawlaha dagaanka si lagu caawiyo. Si foojigan u raac tilmaamaha calaamada. Xidho dharka ay kuu sheegeyso calaamadu si aad isga ilaaliso suntan.

Dagalka calaamada ku dul qoran oo kaliya isticmaal, iyo wixii dhibaatooyin ee ku qoran halkaa. Ha isticmaalin suntan cayayaanka haddii aan meesh laguugu sheegin, Waayo suntu waa qaali, haddii aad in badan isticmaasho dhib ayey u geysan dhulka, adiga, iyo dagalka.

Haddii aanad aqoon nooc aad iibsato suntan cayayaanka, ama inta aad ku shubi karto dagalkaaga, soo wac Jamicadaada Minnesota xafiiska Fidista Hawlaha dagaanka si lagu caawiyo.

Dagal beerasho Wanaagsani waxey u Baahantahey Qorshe

Wakhtiga Jiilaalka ee aanad mashquul ku aheyn abuurka iyo iibinta dagalkaaga, waxad ka shaqeyn kartaa qorshe aad cayayaanka kaga difaacdo dagalka. Ku bilow waxa aad aqoon u leedahey dagalkaaga oo aad hore u beertey. Cayayaan side ah ayaa muuqda? Maxaa kuu shaqeyey ee baabiiyey cayayaanka? Maxaan shaqeyn? Samee qorshaha sannadka soo socda adigoo ka fiirsanaya wixii aad beeri laheyd. Maxaa soo jiidan kara ama aan soo jiidan karin cayayaanka, iyo sidii dabeeci ah ee cayayaanka aad uga fogeyn laheyd dagalkaaga. Marka wax kastaa noqdaan guuldaro, isku dey suntee cayayaan baad isticmaali kartaa, ama teebaad awoodi kartaa, iyo sidee ugu wanaagsan ee suntan cayayaanku ay dhibta u ilaalin karto.

Qorshe haddii aad leedahey waxyaab badan ayaad diyaar u noqon kartaa. Adiga oo kalsooni qaba ayaad xiliga dagal

beerista dambe gaadh. Sida qorshe kastaa leeyahey,
waxa laga yaabaa in uu isbadal yimaado. Haddii aad
badashid qorshihii iyo haddii kalaba, anagu haddii
aanu nahey Jaamicada Minnesota xafiiska Fidista
Hawlaha dagaanka had iyo jeer waxanu halkan u joog-
naa in aan adgia ku caawino.

Translated by Saad Samatar; edited by Mary Meyer, Extension Horticulturist.

Copyright 2007 © Regents of the University of Minnesota. All rights reserved.

In accordance with the Americans with Disabilities Act, this material is available in alternative formats upon request. Please contact the Extension Store at (800) 876-8636.

University of Minnesota Extension is an equal opportunity educator and employer.